GREATER PORTLAND HEALTH
CARING FOR THE WHOLE COMMUNITY

# Xogta Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga

Waalidka/Masuulka Qaaliga ah,

Ayada oo kaashanaysa Portland, Westbrook iyo South Portland Public Schools iyo Maine Medical Center, Greater Portland Health (GPH) waxay bixisaa adeegyada xarunta caafimaadka ee dugsiga ee: Dugsiyada sare ee Portland, Deering, iyo Casco Bay, PATHS, Dugsiga Dhexe ee King, dugsiyada dhexe iyo sare ee Westbrook, iyo dugsiyada dhexe iyo sare ee South Portland.

Fadlan buuxi foomka diiwaangelinta caafimaadka ee ku lifaaqan si aad u oggolaato cunugaaga inuu helo adeegyada caafimaadka ee ku saleysan dugsiga ee Xarunta Caafimaadka Dugsiga GPH iyo goob kasta oo daryeel caafimaad oo aasaasi ah oo GPH ah oo u adeegta carruurta. **Haddii ilmahaagu uu horey u haysto daryeel caafimaad oo caadi ah ama daryeel caafimaad oo maskaxeed, weli waad ku qori kartaa barnaamijka Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH.** Yoolkeenu waa in dhamaan caruurta iyo qoysaskoodaba ay ku xirnaadaan daryeel caafimaad oo aasaasi ah. Goobaha caafimaadka ee GPH waxay ka caawiyaan daryeel bixiyaha caadiga ah ee ilmahaaga, sidoo kalena daryeelka waxaa la isku waafajinayaa daryeel bixiyaha. Fadlan booqo bogga internetka ee GPH (https://www.greaterportlandhealth.org/ services/school-based-health-centers) wixii macluumaad dheeraad ah.

Sheegashooyinka caymiska waxaa loo gudbin doonaa adeegyada la bixiyay, sida ay khuseyso. Haddii bukaanku uusan lahayn caymis, Greater Portland Health waxay bixisaa qiimo jaban.

| **Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiyada ee Portland waxay bixiyaan:** | **Shanta sababood ee ugu badan ee ilmahaaga lagu qoro:** |
|---|---|
| • Adeegyada Caafimaadka ee Aasaasiga ah<br>• Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka<br>• Adeegyada Dhimirka<br>• Adeegyada Caafimaadka Ilkaha (diiwaan gelin gaar ah)<br>• Adeegyada Caafimaadka Lagu bixiyo Khadka<br>• Maareynta Kahortaga Uurka, ayna ku jirto kahortaga uurka ee degdega ah<br>• Qalliinka jirka, oo ay ku jiraan<br>• Xanuunada ciladaha | 1. Shaqaale saaxiibtinimo leh, oo daryeel badan<br>2. Qorsheyn ku habboon oo degdeg ah (looma baahna gaadiid!)<br>3. Isku xirka daryeelka aasaasiga ah ee ilmahaaga<br>4. Daryeel tayo leh oo naxariis leh, oo daryeel badan<br>5. Kormeerka fudud ee xaaladaha dabadheeraadka ah |

**Baakadan waxaa ku jira:**

- Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo (FAQ) ee ku saabsan Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH- *si aad u ilaaliye*
- Ogaysiiska Adeegyada Asturnaanta ee Caafimaadka Magaalada Portland- *si aad u ilaaliso*
- Foomka diiwaangelinta caafimaadka – **buuxi oo saxiix kadibna u gudbi xarunta caafimaadka ama kalkaalisada caafimaadka ee masuulka .**
- Oggolaanshaha Guud ee Daaweynta- **Fadlan saxiix oo u gudbi xarunta caafimaadka ee iskuulka ama kalkaalisada caafimaadka ee uurka .**
- Oggolaanshaha Shaacinta Macluumaadka– **Fadlan saxiix oo u gudbi xarunta caafimaadka ee iskuulka ama kalkaalisada caafimaadka ee masuulka .**

*Wixii su'aalo dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir (207) 874-2141 X 7 ama email ahaan oo nagala so xariirgphschoolhealth@greaterportlandhealth.org.*

## Su'aalaha Badanaa la Iska Waydiiyo Xarumaha Caafimaadka

## Dugsiga ee Greater Portland Health

**Su'aal: Waa kuwee dugsiyada leh xarumaha caafimaadka?**
**Jawaab: Gudaha Portland:** Dugsiga Dhexe ee King, Dugsiga Sare ee Deering, Dugsiga Sare ee Portland, Dugsiga Sare ee Casco Bay iyo PATHS
**Gudaha Westbrook**: Dugsiga Dhexe iyo Sare ee Westbrook
**Gudaha South Portland:** Dugsiga Sare ee South Portland and Middles.

**Su'aal: Sidee ayaan u diiwaan gelinayaa ilmahayga?**
**Jawaab:** Buuxi oo saxiix foomka diiwaan gelinta. Foomka la buuxshay ayaa lagu celin karaa qaababka soo socda: lagu celiyo xarunta caafimaadka ee dugsiga (SBHC), kalkaalisada dugsiga ama macalinka fasalka.

**Su'aal: Ilmahayga muu eegi karaa dhakhtarka caafimaadka ee Greater Portland Health (GPH) SBHC ama adeegga daryeelka aasaasiga ah haddii foomka diiwaan gelinta oo waalidku saxiixay aan la soo celin?**
Jawaab: Ilmaha yaryar (ka yar 18 sano jir*) waa in ay haystaan foomka diiwaan gelinta oo saxiixan kahor inta uusan qaabilin dhakhtar. Foomka diiwaan gelinta ayaa ah cadeynta ogolaanshaha si loo baxsho adeegyada caafimaadka iyo daryeelka dhimirka ee ilmaha.

Ogolaanshaha hadalka ee waalidka ama masuulka ilmaha ayaa u sahlaaya bixiyaha inuu qaabilo ilmaha **halmar keliya**. Foomka diiwaan gelinta oo la buuxshay oo saxiixan ayaa u baahan in la soo celiyo kahor inta aan wax adeegyo ah la bixin.

*Ilmaha aan qaan gaarin ayaa bixin kara ogolaanshaha dhammaan adeegyada caafimaadka, dhimirka, ilkaha iyo tallo bixinta kale ee caafimaadka haddii ilmaha aan qaan gaarin uu:

- Ku nool yahay meel gaar ah oo ka madax banaan yahay taageerada waalidka
- Xaas leeyahay
- Uu xubin ka yahay Ciidanka qalabka Sida
- Uu awood u leeyahay

Haddii ardaygu ka wayn yahay 18 sano jir, wuu buuxin karaa oo saxiixi karaa foomkiisa diiwaan gelinta si uu uga helo adeegyada adeeg kasta ama xarunta GPH.

**Su'aal: Maxaa u qalma booqasho qarsoodi ah?**
Carruurta ka diiwaan gashan SBHC ayaa heli doona adeegyada qarsoodiga ah (ilaa in ilmuhu doorto maahee in uu waalidkiis ka qaybgeliyo daryeelkiisa uuna bixiyo ogolaansho arintaas lagu sameynaayo). Adeegyada soo socda ayaa loo arkaa booqashooyin sir ah:

- Khamrada iyo adeegsiga daroogada iyo maandooriyaha
- Baaritaannada iyo daawaynta HIV iyo cudurada kale ee galmada la iskugu gudbiyo
- Adeegyada daryeelka hooyada iyo dhallaanka
- Daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaan socodka
- Maareynta xakamaynta uurka (ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna: kondhomyada, kaniiniyada kahortaga uurka ee afka laga qaato, jaamanka kahortaga uurka, kaniiniyada kahortaga uurka ee xaalada degdega ah; <u>ee ardayda dugsiga sare</u>: cirbadaha kahortaga uurka, talaalka kahortaga uurka, iyo aaladaha kahortaga uurka ee murqaha la gasho ayaa sidoo kale la heli karaa)

**Su'aasha: Miyaan u baahan nahay in aan diiwaan gasho ilmahayga haddii uu horey bukaan uga ahaa GPH?**
**Jawaab:** Haa

**Su'aasha: Ilmaha ma lagu qaabili karaa SBHC haddii aysan haysan wax caymis ah?**
**Jawaab:** Haa

**S: Waxaan qabaa su'aal ku saabsan ceymiska ama biilka aan helay.**
**J:** Haddii aad dooneyso inaad ka wada hadasho caymiska iyo xulashooyinka lacag bixinta, oo ay ku jiraan qiimeynteena qiimeynta, fadlan wac (207) 874-2141 oo ku qor 5058 si aad ula xiriirto La-taliyayaasha Gargaarka Maaliyadeed. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan kharashaadka ama adeegyada ku qoran biilkaaga, fadlan wac (207) 874-2141 oo riix 6 si aad ula xiriirto Waaxda Biilka.

**S: Waa maxay sababta aad warbixinta dakhliga guriga uga codsanaysid foomka diiwaangelinta? Ma diidi karaa inaan ka jawaabo su'aashan? J:** GPH waxaa laga rabaa inay soo gudbiso heerarka dakhliga ee bukaanadeena si loogu maalgeliyo xarumaheena caafimaadku .
Macluumaadka bukaanka shaqsiga ah lama wadaago, heerka dakhliga cunuguna saameyn kuma yeesho daryeelka ay helaan. Waxaad diidi kartaa in aad bixiso macluumaadka dakhliga.

**S: Waa maxay farqiga u dhexeeya shaqada kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka iyo tan SBHCs?**
**J:** Kalkaalisada caafimaadka ee iskuulku waxay qiimeysaa xaaladaha caafimaad si ay u go'aamiso in cunuggu u baahan yahay daryeel caafimaad oo aasaasi ah. Kalkaaliyayaasha caafimaadka ee dugsiyada waxay awoodaan inay baaraan caqabadaha barashada, dib u eegista xaaladda tallaalka, kala soocida ama daaweynta shilalka iyo cudurrada, maamulka daawooyinka iyo taageerada guusha waxbarashada iyada oo loo marayo IEPs iyo IHPs.

SBHCs waxay bixiyaan barta gelitaanka iyo isha daryeelka aasaasiga ah ee carruurta waxaana ka shaqeeya bixiyeyaasha caafimaadka caafimaadka iyo dhaqanka (tusaale ahaan dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, kaaliyayaasha dhakhtarka, iyo shaqaalaha bulshada ee ruqsad haysta). Carruurta la diiwaangeliyey waxay dooran karaan GPH inay noqoto hoyga caafimaad ee ugu weyn, taas oo siineysa daryeel isku-duuban oo la heli karo sanadka oo dhan. Haddii uu ilmuhu daryeelka aasaasiga ah ka helay meel kale, bixiyayaasha daryeelka aasaasiga ah ee SBHC waxay daryeelka la xiriiriyaan bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee ilmaha.

**S: Adeegyo noocee ah ayaa laga bixiyaa SBHCs?**
**Jawaab:** Adeegyada la baxsho waxaa kamid ah: baaritaanka jirka ciyaaraha, baaritaanka iyo daawaynta xanuunnada dabo dheeraada, talaallada, tallo bixinta caafimaadka dhimirka, qaadista dhiiga (dhiiga lagu qaado shaybaarada) iyo maareynta kahortaga uurka.

**Su'aal: Daruuri ma tahay in ilmuhu u tagaan kalkaalisada dugsiga marka koobaad ama waa inay toos u aadaan SBHC?**
**J:** Carruurta ku jira adeegyada caafimaadka iskuulka waxay dooran karaan halka ay marka hore aadi doonaan. Cunugga is diiwaangeliya waxaa mar walba lagu soo dhaweynayaa inuu soo galo SBHC kasta inta lagu jiro saacadaha furan. Ballanta waxaa horay u sii qabsan kara kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka ama cunugga.

**S: Ilmahayga ma ku arki karaa SBHC xitaa haddii aysan dhigan iskuulkaas?**
**Jawaab:** Haa, haddii ilmahaagu ka diiwaan gashan yahay adeegyada caafimaadka ee dugsiga ee GPH, waxaa lagu qaabili karaa midkood xarumaheena SBHC-yada iyo adeegga daryeelka aasaasiga ah ee GPH oo u adeegga carruurta.

**S: Miyaan u baahanahay inaan cunuggayga sanad walba dib ugu qoro adeegyada caafimaadka ee GPH? Hadii cunuggaygu ka tago Westbrook, South Portland ama Portland iskuulada, weli ma u bukaan GPH?**
**J:** Ilmahaagu haddii uu arday ka yahay dugsiyada Westbrook, South Portland ama Portland Public Schools, uma baahnid inaad sanad walba soo gudbiso waraaqo cusub. Sidoo kale uma baahnid inaad keento waraaqo dheeraad ah si ilmahaaga loogu arko mid ka mid ah xarumaheena GPH SBHC ama xarumaha daryeelka aasaasiga ah ee GPH ee carruurta lagu daryeelo.

Haddii ilmahaagu uusan ahayn arday ka diiwaan gashan mid ka mid ah saddexda nidaam ee dugsiyada, waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto GPH adigoo wacaya 874-2141 oo aad weydiisato in ilmahaagu uu sii ahaado bukaan mid ka mid ah xarumaheena daryeelka aasaasiga ah ee u adeega carruurta. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo waraaqo dheeraad ah.

**S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu u baahan yahay daryeel caafimaad wakhtiyada ka baxsan iskuulka?**
**J:** Waxaad ballan ka qabsan kartaa xarun kasta oo GPH ee daryeelka aasaasiga ah ee carruurta, adigoo wacaya 874-2141. Haddii ilmahaagu uu leeyahay daryeel bixiye kale oo aan ahayn GPH, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa isaga.

**S: Ilmahaygu ma awoodi doonaa inuu helo adeegyada SBHC inta lagu jiro xilliyada waxbarashada fog ama jadwalka iskuulka ee la beddelay?**
J: Haa. Dhammaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo caafimaadka dabeecadda waxay awood u leeyihiin inay ballan ka qabsadaan bukaannada (via ZOOM ama taleefan). Si aad u hesho macluumaadka xiriirka ee saxda ah ee ku saabsan la-talinta daryeelka caafimaadka fogaanta ah, ku qor foomka diiwaangelinta cinwaanka emaylka ee ilmahaaga.

Wixii su'aalo dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir (207) 874-2141 X 7 ama email ahaan kala xariir gphschoolhealth@greaterportlandhealth.org.

# OGAYSIISKA DHAQAMADA QARSOODINIMADA XOGTA

**Ogeysiiskan wuxuu qeexayaa sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo loona shaacin karo, xuquuqahaaga ku aadan macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo ("PHI"), sida loo gudbiyo cabasho ku saabsan jebinta qarsoodinimada xogta ama amniga PHI-gaaga, ama xuquuqahaaga ku aadan macluumaadkaaga PHI. Waxaad xaq u leedahay inaad nuqul ka sameysato Ogeysiiskan (qaab warqadeed ama qaab elektaroonig ah) iyo inaad kala hadasho Sarkaalka Qarsoodinimada Xogta ee Greater Portland Health ("GPH") adigoo isticmaalaya 207-874-2141 haddii aad qabtid wax su'aalo ah.**

**Ogeysiiskan wuxuu khuseeyaa dhammaan PHI-yada, oo ay ku jiraan, haddii ay khuseyso, Macluumaadka Daaweynta ee Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha ("SUD").**

**Isticmaalka iyo Shaacinta macluumaadkaaga PHI:**
Markaad adeegyada daryeelka caafimaadka ka raadiso GPH, diiwaan ku saabsan macaamilkaas ayaa la diiwaangeliyaa. Diiwaankaan waxaa ku qornaan kara astaamaha, baaritaanka iyo natiijooyinka baaritaanka, xanuunka, daawaynta, iyo qorshaha daryeelkaaga/adeegyadaada mustaqbalka. Macluumaadkani waa qayb ka mid ah diiwaankaaga caafimaadka waana qayb muhiim ah oo ka mid ah daryeelka/adeegyada caafimaadka ee aan ku siino. Macluumaadka adiga kugu saabsan ee ku jira diiwaanka waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa PHI, GPH-na waxaa ku waajib ah sharciyan inay ilaaliyaan qarsoodinimada xogtaada PHI. Wixii isticmaal iyo shaacin ah oo ku aadan macluumaadkaaga PHI ee aan lagu sharraxin ogeysiiskan waxaa loo oggolaan doonaa oo keliya marka laguu soo diro ogeysiis iyo marka la helo ogolaanshahaaga qoran ee hordhac ah, oggolaashahaas oo aad xaq u leedahay inaad la noqoto wakhti kasta. Tusaale waxaa ka mid ah hawlaha suuqgeynta.

**Waxaan isticmaali karnaa oo aan shaacin karnaa macluumaadkaaga PHI iyada oo aan la helin oggolaansho qoraal ah oo gooni ah**:

- Si loo qorsheeyo oo loo bixiyo daryeelkaaga iyo daaweyntaada,
- Si loola xiriiro xirfadlayaasha caafimaadka ee gacan ka geysta daryeelkaaga,
- Si lacag bixiyeyaasha qollooyinka saddexaad (shirkadaha caymiska) loogu xaqiijiyo in adeegyada la bixiyay,
- Marka la fulinayo hawlaha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan qiimeynta tayada ee ku saabsan daryeelka aan bixinno iyo natiijooyinka aan gaarno,
- Si laguu ogeysiiyo adeegyada iyo daaweynta laga yaabo inay ku khuseeyaan
- Si loogu hoggaansamo sharciyada gobolka iyo federaalka ee na faraya inaan shaaca ka qaadno macluumaadkaaga PHI, iyo
- Haddii macluumaadkaaga PHI ay ku jiraan diiwaannada SUD ee la sameeyay iyadoo lala xiriirinayo barnaamij SUD ah oo lagu maalgeliyo maalgelinta federaalka, iyo haddii aad bixisay foom oggolaansho bixin ah oo lagu oggolaanayo in macluumaadkaaga kale ee PHI loo shaaciyo qollo saddexaad, oggolaanshaha ayaa ku filan sharciyan in la shaaciyo macluumaadka SUD.

**Xaddidaadaha Gaarka ah**:
Ma shaacin doonno macluumaadka PHI ama kama markhaati furi doonno waxa ku jira diiwaannadaada qarsoodiga ah ee dacwad kasta oo madani ah, maamuleed, dambiyeed, ama sharci-dejineed iyada oo aan la helin ogolaanshahaaga gaarka ah ee qoran ama amar maxkamadeed. In macluumaadkaaga PHI loo soo bandhigo dacwadaha maxkamadda (iyadoo lagu saleynayo amar maxkamadeed ama amar kale oo sharci ah iyo Amar Maxkamadeed) ma dhici doonto iyada oo aan marka hore lagu siinin ogeysiis si aan kuu siino fursad aad ugu dooddo soo bandhiggida ama in lagu dhageysto, haddii ogeysiiska iyo/ama fursadda noocaas ah uu farayo sharciga federaalka.

***Shaacinta Ku Saabsan Adeegyada Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha ee Barnaamijka "Qaybta 2".*** Haddii macluumaadkaaga PHI ay ku jiraan diiwaannada SUD ee la soo saaray oo la xiriira Barnaamijka "Qaybta 2" (tusaale ahaan barnaamij SUD ah oo lagu maalgeliyo maalgelinta federaalka), shaacin kasta oo loo oggol yahay ama loo baahan yahay oo loogu talagalay daaweynta, lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka ee loo shaacinayo adeeg-bixiye kale ama Barnaamijka SUD, waxaa sii shaacin kara barnaamijkaas ama adeeg-bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii iyo inta uu oggol yahay sharciga federaalka, iyada oo aan loo baahnayn in ogolaansho qoraal ah oo gooni ah lagaa helo adiga. Haddii aad bixiso foom oggolaansho bixin ah oo oggolaanaya in macluumaadkaaga PHI loo shaaciyo qollo saddexaad, kaas oo daboolaya macluumaadkaaga PHI ee guud iyo sidoo kale diiwaannada SUD, foom oggolaansho bixin ah oo gaar ah looguma baahna shaacinta SUD.

**Xuquuqahaaga Ku Saabsan Macluumaadkaaga Caafimaadka.**
In kasta oo diiwaankaaga caafimaad uu yahay hantida GPH, macluumaadka PHI adiga ayaa iska leh. Sida ku Cad Xeerarka Asturnaanta ee Federaalka, waxaad xaq u leedahay:
- Hesho ogeysiis ku saabsan isticmaalka iyo shaacinta diiwaankaaga caafimaadka, oo ay ku jiraan nuqul warqad ah oo ogeysiis ah haddii la codsado,
- Codsato in xaddidaadyo la saaro isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ama inaad codsato inaan xogahaaga qarsoodiga ah kuugu soo dirno siyaabo kale,
- Baarto oo aad hesho nugulka diiwaankaaga,
- Codsato in diiwaankaaga caafimaad wax laga beddelo,
- Xaqiijiso saxnaanta macluumaadkaaga PHI, iyo
- Codsato sharaxaadda isticmaalada iyo shaacinada qaarkood ee lagu sameeyay macluumaadkaaga PHI.

**Waajibaadyadeena.**
GPH waxaa looga baahan yahay inay:
- Ilaaliso asturnaanta/qarsoodinimada macluumaadkaaga caafimaadka, oo ay ku jiraan qoraallada la-talinta cilminafsiga iyo SUD, marka laga reebo haddii aad adiga oggolaato ama ay jirto ka-dhaafitaan lagu shaacin karo.
- Ku siiso ogeysiis ku saabsan waajibaadka sharciga ah ee GPH iyo dhaqamada qarsoodinimada xogta ee la xiriira macluumaadka caafimaadka ee aan uruurinno ee aan kaa hayno adiga.
- U hoggaansanto shuruudaha Ogaysiiskeenii ugu dambeeyay.
- Ku ogeysiiso haddii GPH aysan awoodin inay u hoggaansanto xaddidaad aad codsatay.
- Qaabisho codsiyada macquulka ah ee ku saabsan siyaabo kale oo lagu soo gudbin karo macluumaadkaaga PHI.
- Haddii ay dhacdo inay GPH ku lug yeelato uruurinta lacagaha, inay ku siiso fursad aad ku doorato inaadan GPH ka helin isgaarsiin la xiriirta lacag uruurin.
- Ku siiso foom oggolaansho bixin ah oo u oggolaanaya GPH inay isticmaasho iyo inay shaaciso macluumaadkaaga PHI iyadoo ujeedadu tahay daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka.

GPH waxay xaq u leedahay inay beddesho oo ay dib u eegis ku samayso dhaqamadeeda qarsoodinimada xogta si ay ugu sii hogaansanto Sharciyada Federaalka iyo Gobolka. Haddii ay dhacdo in la sameeyo isbeddel muhiim ah, Ogeysiis wax ka bedel lagu sameeyay ayaa la heli doonaa ama la qaybin doonaa ilaa inta sharcigu farayo.

**Shaacinada La Ogolaaday Iyadoon La Helin Ogolaansho Bixin.**
GPH waxaa loo oggol yahay inay isticmaasho oo ay shaaciso macluumaadkaaga caafimaad iyada oo aan la helin ogolaanshahaaga:

- Ujeedooyin la xiriira Daaweynta,
- Ujeedooyin la xiriira Lacag-bixinta,
- Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka, iyo
- Marka uu u baahdo sharciga gobolka ama federaalka.
- Marka uu u oggolaado Sharciga, marka lala xiriiro Hawl-galaayasha Ganacsiga; xasuusinta ballamaha; u dirista mas'uuliyiinta daryeelka caafimaadka ee dowladda, oo ay ku jiraan saraakiisha caafimaadka ee gobolka, Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka, ururada kala wareejiya xubnaha jirka, dadaallada ay maamulada ka wadaan hawlaha iyo ilaalinta caafimaadka dadweynaha, oo ay ku jiraan shaacinta loo samaynayo hay'adaha adeegyada ilaalinta carruurta ama dadka waaweyn; xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka; deeq ahaan u bixinta xubnaha ama unugyada jirka; ujeeddooyin cilmi-baariseed iyadoo la shaacinayo kaliya xog aqoonsiga laga saaray; baaraha caafimaadka; adeegyada loogu hoggaansamayo sharciyada ku saabsan magdhowga shaqaalaha; shaqooyin gaar ah oo dawladeed oo la oggol yahay, oo ay ku jiraan hawlgallada militariga ama dadaallada gargaarka masiibooyinka; mas'uuliyiinta fulinta sharciga ee dowladda iyadoo la jawaabayo amar maxkamadeed, ama xaalado kale oo sharciyeed sida in laga warbixiyo dambi ama in laga jawaabo wicitaanno maxkamadeed oo gaar ah.

**Shaacinada La Ogol Yahay ee Lakin Leh Fursad Lagu Diido**. GPH waxay kaala soo xiriiri kartaa, ka dib marka ay ku siiso fursad aad ku diiddo ama aad uga baxdo, ee la xiriirta: shaacinada xogta ee loo shaacinayo xubnaha qoyska iyo daryeelayaasha haddii ay khuseyso ku lug lahaanshaha qofkaas ee daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga; codsiyada ku saabsan gunnooyinka ama alaabada la xiriira caafimaadka; hawlaha lacag-uruurinta; dadaallada/hawlaha suuqgeynta GPH.

**Heshiiska Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan.**
GPH waa xubin ka tirsan Iskaashiga Daryeelka Bulshada ee Maine ("CCPM"), oo ah "Heshiiska Daryeelka Caafimaadka Abaabulan" oo diiradda lagu saarayo wanaajinta caafimaadka bulshooyinka ay u adeegto. Xubnaha CCPM, oo kaashanaaya shirkadaha caymiska, ayaa adeegsada qiimeynada caafimaadka dadwaynaha, dib u eegista adeegsiga, qiimeynta tayada iyo hawlaha hormarinta, iyo xeeladaha kale ee cadeynta ku saleysan si kor loogu qaado caafimaadkaaga. Xubnaha ayaa si guud masuul uga ah caafimaadka dhammaan bukaanka ay u adeegto CCPM. Hay'adaha ka kooban Nidaamkan Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan waxaa ka mid ah xarumaha caafimaadka bulshada iyo isbitaallada soo socda: Xarunta Caafimaadka ee Cary, Xarunta Caafimaadka ee Gobolka Bucksport, Adeegyada Caafimaadka Bulshada, Hay'ada Daryeelka Caafimaadka ee Eastport, Xarunta Caafimaadka Rural Fish River, Xarunta Caafimaadka Qoysaska ee Harrington, Shabakadda Helitaanka Caafimaadka, Xarumaha Caafimaadka Bulshada ee HealthReach, Adeegyada Caafimaadka Bulshada Jasiiradaha, Isbitaalka Mount Desert Island, Xarunta Caafimaadka ee Katahdin Valley, Isbitaalka Gobolka Millinocket, Shirkadda Waxqabadka Bulshada ee Degmada York, Adeegyada Caafimaadka ee Pines, Isbitaalka Penobscot Valley, Adeegyada Caafimaadka ee Pines, Xarunta Caafimaadka ee Gobolka Lubec, Xarunta Caafimaadka ee Sacopee Valley, GPH, Dhakhaatiirta Qoysaska ee Sebasticook, Isbitaalka St. Joseph, iyo Xarunta Caafimaadka Qoysaska ee Gobolka St. Croix. Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan ee CCPM wuxuu u oggolaanayaa hay'adahan kala duwan, oo ay ki jirto GPH, inay wadaagaan macluumaadka PHI marka loo baahdo si ay u fuliyaan daaweynta la oggol yahay, lacag bixinta ama hawlaha daryeelka

caafimaadka ee la xiriira shaqada Nidaamka Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan, marka laga reebo haddii uu si kale u xaddido sharciga, xeerka ama qaanuunka. Liiska hay'adaha waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiiyo si loogu soo daro hay'adaha cusub ee mustaqbalka. Waxaad liiskii ugu dambeeyay ka heli kartaa www.ccpmmaine.org/members ama wac 207-992-9200.

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, Si aad u Codsato xog ama si aad u Soo Sheegto Cilad**

Haddii aad aaminsan tahay in xaquuqahaaga qarsoodinimada xogta ee ku saabsan macluumaadka caafimaadka ee qarsoodiga ah nooc kasta ha ahaatee, oo ay ku jiraan macluumaadka daaweynta SUD ay jabisay GPH, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Qarsoodinimada Xogta ee GPH, 180 Park Ave, Portland, ME 04102. (207) 874-2141); ***www.greaterportlandhealth.org***. Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa Xoghayaha Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee Mareykanka, 200 Independence Ave, S.W., Washington, D.C. 20201 Eeg websaydka Xafiiska Xuquuqaha Madaniga, www.hhs.gov/ocr/hipaa/ si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

GPH sinaba kuuguma ciqaabi doonto inaad cabasho ka gudbiso.

**Dhaqan galaya: Janaayo 2, 2026**

https://www.federalregister.gov/documents/2024/02/16/2024-02544/confidentiality-of-substance-use-disorder-sud-patient-records

# Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga GPH
# Foomka Diiwaan gelinta
## Fadlan buuxi oo ku celi dugsiga

Magaca Dugsiga: ________________________________________ Heerka Fasalka Dugsiga: _____________

Magaca ilmaha (magaciisa ugu horeeya, kan ugu dambeeya iyo kan dhexe): ___________ Taariikhda dhalashada: _____/ _____/ _____ Jinsiga sharciga ah (wareegga koowaad): M Furan
(La mid ah kaarka MaineCare, haddii ay khuseyso) bil / maalin / sanad

Ciwaanka: ______________________________________________ Boodhka Boostada: _________________ Bilaa Hooy ☐

Waalidka/MasuulkaTaleefanka: ________________ Fariin codka ah Waa hagaag? Haa/ Maya Waalidka/MasuulkaCiwaanka imeylkas: ____________

Magaca Caymiska ______________________Lambarka Aqoonsiga Caymiska __________

Kooxda#________________Cinwaanka shirkadda caymiska______________________

Magaca waalidka/masuulka________________________ Taleefanka# _____________

Lambarka aqoonsiga ee MaineCare (wuxuu ku dhamaadaa A) ___________________

**Ilmahaagu ma leeyahay celin ? Haa/ Maya**

Haddii aad dooneyso inaad ka wada hadasho caymiska iyo fursadaha lacag bixinta, fadlan wac (207) 874-2141 oo ku qor 5058 si aad ula xiriirto La-taliyayaasha Kaalmada Maaliyadeed.

**Macluumaadka caafimaadka:**

Xagee ilmahaagu inta badan ku daryeelaa? ___Caafimaadka iftiinka waqooyiga ___InterMed ___MaineHealth ____Martin's Point ____Caafimaadka Magaalada Portland ee Weyn Waxaana kale:____

Cunuggayga waxaa la sameeyey baadhitaan caafimaad labadii sano ee ugu dambeysay. _______________HAA_____MAAY_______Ma hubo in ilmahaygu uu doonayo loobaanyahay

Talaalada sanadkan. ______HAA ________MAYA _______Ma hubo

Ilmahaagu ma leeyahay Asthma? HAA/MAYA Qorsheynta Cudurka Shuban-biyoodka ee iskuulka? HAA/MAYA

Ilmahaagu ma qabaa cudurka sokorowga? HAA/MAAY Qorsheynta cudurka Sokorowga ee dugsiga? HAA/MAYA

Dhibaatooyinka kale ee jirka, ilkaha ama maskaxda: ________________________________

**Taariikhda Caafimaad ee Shakhsiga/ Qoyska**–
Fadlan hubi taariikhda qoyska ee xaaladaha caafimaad ee soo socda:

___Xasaasiyaadka ___Xanuunka sokorowga
___Xanuunada difaaca jirka ___ Neefta
___ Cudurka wadnaha ___Xanuunada maskaxda
___Khamrada/Maandooriyaha ___Dhiigkarka
___ Kalastarool sareeya ___Qaaxada(Tiibisho)

Tartanka Carruurta (ka hubso mid ama ka badan): ________ Cadaan ________Madoow, Afrikaan, Madoowga Mareykanka ____ U dhashay Jasiiradaha Pacific-ga ee Kale _____ Aasiyaan

______Hindida Koonfurta/Bartamaha/Waqooyiga Ameerika, Dadka Asaliga ah ee Alaska. ____Hawai Dhalad ah ________ Qowmiyadaha kala badan

Qoomiyadda: ___Hispanic/Latino ___Aan ahayn Hispanic/Latino

Guud ahaan Dakhliga Sanadlaha ah ee Qoyska: _________ Tirada guud ee xubnaha qoyska ee guriga ku nool: _________________

Magaca damaanad-qaadaha (qofka qaabilsan biilasha daryeelka caafimaadka ilmaha): ________ Taariikhda Dhalashada : ____ Xiriirka ilmaha la weelasha __________

Aniga oo saxiixaya foomkan, waxaan qiray oo fahmay in:

- Aan helay aana akhriyay Warqadda Xogta ee Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee Greater Portland Health's ("GPH"), taas oo sharxaysa waxa ay yihiin Xarumaha Caafimaadka Dugsiga ee GPH iyo noocyada adeegyada iyo dheefaha ay siin karaan ilmahayga.
- Goobaha caafimaadka ee iskuulaadka GPH waxay ka gooni yihiin iskuulada iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ee iskuulada. Waxay bixiyaan qiimeynta daryeelka aasaasiga ah iyo daaweyn caafimaad oo kala duwan oo ku saabsan goobaha dugsiga ku saleysan iyagoo la xiriira bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka oo laga yaabo inay sidoo kale ku lug yeeshaan daryeelka ilmahayga.
- Ogolaanshuhu wuxuu shaqeynayaa inta cunuggaygu ka diiwaan gashan yahay iskuulada soo socda: Portland, Westbrook, ama South Portland, haddii aanan horey qoraal uga noqon.
- Waxaa la iga doonayaa in aan akhriyo oo saxiixo Foomka Ogolaanshaha ee Adeegsiga iyo Shaacinta Xogta Daryeelka Caafimaadka ee quseeya diiwaan gelinta ilmahayga ee Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Dugsiga ee GPH.

Waxaan si buuxda u aqriyay foomkan waxaanan oggolaaday in aan cunuggayga ka diiwaan geliyo Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiyada GPH waqtigan.

✍ **Saxiixa Waalidka/Masuulka:** ________________________________________________ Taariikhda:______________

Magaca shaqsiga: ______________________________________________Xiriirka________________________

**OGGOLAANSHAHA GUUD EE DAAWEYNTA**
100 Brickhill Ave, Suite 301, South Portland, Maine 04106
Taleefan. (207) 874-2141   Fakis (207) 761-3738

**Magaca Bukaanka:________________________________________Taariikhda Dhalashada:________________________**

**Greater Portland Health (GPH) waa xarun caafimaad bulsho oo bixisa daryeel caafimaad oo isku dhafan oo loogu talagalay caafimaadka maskaxda iyo jirka, oo ay ku jiraan HIV/AIDS, iyo adeegyada ilkaha, oo uuna helo qof kasta oo bulshada ka tirsan. GPH waxay isticmaashaa diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah (EHR) oo ay ku jiraan dhammaan xogta caafimaadka oo laga helayo hal meel. Si laguu siiyo daryeelka ugu fiican ee suurtagalka ah, dhakhaatiirta GPH waxa laga yaabaa inay arkaan qayb kasta oo ka mid ah diiwaanka caafimaadkaaga ee khuseeya daaweyntaada, oo ay ku jiraan xogta caafimaadkaaga jirkaaga, maskaxdaada, isticmaalka mukhaadaraadka iyo/ama diiwaanka daryeelka ilkaha.**

1. **Oggolaanshaha Guud ee Daaweynta:** Waxaan oggolaansho siinayaa dhakhaatiirta GPH si ay u sameeyaan baaritaanada, tijaabooyinka cudur ogaanshaha iyo habraacyada lagu qiimeeynayo xaaladaha daryeelka caafimaadkayga, iyo si la ii siiyo daryeel (oo ay ku jiraan daaweynta xaaladaha degdega ah), adeegyada ama daaweynta lagama maarmaanka u ah in si wax ku ool ah la ii baaro la iiguna daweeyo. Waxaan fahamsanahay inay tahay mas'uuliyada dhakhtarka(dhakhaatiirta) daryeelka caafimaadkayga inay ii sharaxaan nooca daryeelka la soo jeediyay, daaweynta, adeegyada, daawooyinka la qoray, daryeelka la soo jeediyay, ama baaritaanada. Ka hor inta aanan marin wax habraacyo ama baaritaan ah, dhakhaatiirtayda ayaa sharaxi doona faa'iidooyinka suurtagalka ah, khataraha dhalan kara, ama dhibaatooyinka laga dhaxli karo, oo ay ku jiraan dhibaatooyinka suurtagalka ah ee dhici kara inta lagu jiro muddada soo kabashada, suurtagalnimada in lagu guulaysto, fursadaha kale oo ay ku jiraan khataraha la xiriira ama waxyeellooyinka kale, iyo sidoo kale xogta natiijooyinka suurtagalka ah ee ka dhalan kara in la diido daaweynta lagu taliyay.
2. **Xaquuqda Diiditaanka Daaweynta:** Waxaan fahamsanahay inaan diidi karo baaritaan kasta, habraac, nidaam, daaweyn, daryeel kasta, ama daawada lagu taliyo ama ay u arkaan inay lagama maarmaan tahay daryeel bixiyaashayda iyo inaan masuul ka sii ahaanaayo go'aamada ku saabsan daryeelkayga caafimaad iyo cawaaqibta go'aanadaas ka dhalan kara.
3. **Waajibaadka Lacag Bixinta:** Waxaan fahamsanahay inay qasab tahay inaan siiyo GPH kharash kasta oo ka dhasha daaweyntayda. Waxaan codsanayaa in bixinta dheefaha la daboolay ee la oggolaaday lagu bixiyo kharashka GPH ee ku baxa adeegyadan. Waxaan fahamsanahay in GPH ay wadaagi karto xogtayda caafimaad, oo ay ku jiraan macluumaadka la xiriira HIV/AIDS, daaweynta cudurrada isticmaalka maandooriyaha (sida sharcigu oggolaaday ama uu farayo), iyo daryeelka caafimaadka maskaxda, ayna la wadaagi karto shirkadda caymiska si loo bixiyo lacagta iyo sababo la xiriira xaqiijinta gunnooyinka.
4. **Ogeysiiska Dhaqanada Ilaalinta Qarsoodinimada Xogaha:** Waxaan fahamsanahay in GPH ay ku qasban tahay inay ilaaliso qarsoodinimada xogta caafimaadka, laakiin si sharci ah waxay u isticmaali kartaa xogtayda caafimaadka si loogu adeegsado daweynayo, helida kharashka adeegyada la i siiyo, isku-dubaridka daryeelka aniga aan helo, ama hawlaha gudaha ee muhiimka u ah GPH.
5. **Sii-deynta Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka:** Waxaan fahamsanahay in, iyadoo shuruudo gaar ah ay ku xiran yihiin, aan codsan karo xaddidaad ku saabsan sida xogtayda loo wadaago, aan codsan karo in wixii isgaarsiin ah in la iigu soo hagaajiyo cinwaan ama lambar taleefan oo gaar ah, isla markaana aan dib u eegis ku sameeyo ama nuqullo ka helo macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo anigoo qoraal ahaan u gudbinaya codsi. Waxaan leeyahay xuquuqo kale oo ku saabsan xogta caafimaadkayga sida lagu sheegay NPP.
6. **Caymiska**: Haddii aan haysto caymis shaqeynaya, waxaan u baahanahay inaan xaqiijiyo in qorshahayga caymiska uu ku jiro dhakhtarkayga daryeelka aasaasiga ah ee GPH (PCP) si qaab fiican loogu dalaco wixii kharashaad ah loona helo daryeelka gaarka ah. Waxaan fahamsanahay in GPH ay xaq u leedahay inat la xariirto shirkadayda qorshaha caymiska si loo helo xog cusub haddii dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah ee ku qoran meeshaas aanu sax ahayn.
7. **HealthInfoNet (HIN) iyo Nidaamka Macluumaadka Tallaalka Maine (ImmPact):** GPH waxay ka qaybqaadataa labada nidaamba. HIN waa madal elektaroonig ah oo ammaan ah oo ay bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka Maine ku wadaagaan macluumaadka bukaanka si loo oggolaado gaaritaanka go'aamo daaweyn oo qofka uu xog ogaal u yahay. ImmPact waa keyd dhexe oo ammaan ah oo ay maamusho dowladda oo loogu talagalay diiwaanada tallaalada. Adeeg-bixiyeyaasha Maine waa inay tallaalada ku diiwaangeliyaan halkaas. Kuwani waa barnaamijyo la iskaga bixi karo; haddii aad rabto inaad wax badan ogaato ama inaad ka baxdo, weydii xubin ka tirsan kooxda daryeelka.
8. **Natiijooyinka Shaybaarada:** GPH waxay heshiis la gashay NorDx Laboratories si loo qabto wixii adeegyada shaybaarada gaarka ah. Marka baaritaanka ay maamusho NorDx, natiijooyinka waxaa laga dhex heli karaa EHR-ga MaineHealth. Bixiyeyaasha GPH iyo MaineHealth labaduba waxay heli karaan natiijooyinka shaybaarkaaga si ay u taageeraan daryeelkaaga, gacan uga gaystaan gaaritaanka go'aanno xog ogaal loo yahay, iyo isku dubaridka daaweynta.

9. **Tiknoolajiyada Caawimaadda**: GPHwaxay isticmaashaa qalab kombiyuutar oo casri ah, oo ay ku jirto Artificial Intelligence (AI), si ay u taageerto adeeg-bixiyeyaasha iyo kooxaha daryeelka. Teknoolojiyadan bedel uma ahan adeeg-bixiyahaaga caafimaadka. Kuma tiirsanaano nidaamyada AI inay go'aannada ka gaaraan daryeelkaaga. Dhakhtar ruqsad leh oo idin yaqaan adiga iyo taariikhdaada caafimaad ayaa sameyn doona qiimeyn iyo talooyin kama dambays ah oo ku saabsan cillad ogaanshaha iyo daaweyntaada.

10. **Xeerarka Habdhaqanka Wanaagsan:** GPH waa inay ahaataa goob badqab ah oo ixtiraam u leh qof walba. Habdhaqanka aan ammaanka ahayn, xadgudubka leh, ama hanjabaadda ah waa mid aan la aqbali karin waxayna keeni kartaa in la sameeyo heshiisyo daryeel wadajir ah iyo suurtagalnimada ah in qofka laga joojiyo xarunta.

11. **Xuquuqaha cabashooyinka**: Waxaan ka warqabaa xuquuqahayga cabashada ee lagu qeexay Siyaasada Wax-ka-qabashada Cabashada Caafimaadka ee Portland.

12. **Saxiixa:** Marka aan hoos saxiixo, waxaan aqbalay inaan akhriyay aana fahmay xogta lagu xusay kor. Haddii aan su'aalo ka qabo oggolaansho bixintayda, waxaan weydiin doonaa xubin ka tirsan kooxda daryeelka ka hor inta aan foomkan saxiixin.

**Saxiixa Foomka**__________________________________________________________ **Taariikhda** ________

(Haddii aad ka yar tahay 18 sano, waalid ama masuul sharciyeed waa inuu saxiixaa) *ccg5/2026*

**Xarumaha Caafimaadka Dugsiyada ee Greater Portland Health**

**Oggolaansho Shaacinta Macluumaadka**

**Marka aan hoos saxiixo, waxaan qirayaa aana aqbalayaa waxyaabaha soo socda, ee quseeya ka diiwaan gelinta ilmahayga Barnaamijka Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Dugsiga (SBHC) ee Greater Portland Health (GPH) iyo shaacinta diiwaanka caafimaadka iyo xogta la xiriirta ee ilmahayga:**

- Waan helay waana akhriyay Ogeysiiska Xeerarka Sirta ee GPH kaas oo sharxaaya arimaha quseeya adeegsiyada iyo shaacinnada lagu sameyn karo xogta caafimaadka ee diiwaanka caafimaadka ilmahayga, sida ku cad heerarka qarsoodiga ee sharciga HIPAA.

- Waxaan u ogolaanayaa xarumaha GPH SBHC inay helaan diiwaanka caafimaadka dugsiga ee ilmahayga, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna diiwaannada caafimaadka jirka, dhimirka iyo tallo bixinta, hadday jiraan, iyo xog kasta oo la xiriirta, si loogu adeegsado daawaynta ama sida kale ee uu amraayo ama ogolyahay sharcigu sida ay go'aamiso GPH SBHC.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay siiso Dugsiga (ayna ku jirto kalkaalisada iyo shaqaalaha bulshada) xogta ka timid diiwaannada GPH SBHC sida muhiimka u ah ee ku haboon daawaynta ama sida kale ee uu amraayo ama ogol yahay sharcigu sida ay go'aamiso GPH.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay xogta ku jirta diiwaannada GPH SBHC (ayna ku jirto diiwaannada caafimaadka haddii ay ku jiraan diiwaanka GPH SBHC) la wadaagto dhakhaatiirta kale iyo bixiyaasha daawaynaaya oo ay ku jiraan dhakhaatiirta aasaasiga ah, dhakhaatiirta ilkaha, iyo xirfadleyaasha caafimaadka dhimirka, si loo fududeeyo bixinta daryeelka caafimaadka ee ilmahayga.

- Waxaan u fasaxayaa dhakhtarka aasaasiga ah ee ilmahayga, dhakhtarka ilkaha, iyo xirfadlaha caafimaadka dhimirka ("Dhakhaatiirta Dhinaca Sadexad") in ay xogta iyo diiwaannada caafimaadka siiyaan GPH SBHC si loo fududeeyo bixinta daryeelka caafimaadka ee ay siinayso GPH SBHC ilmahayga. Waxaan fahmayaa in ay Dhakhaatiirtaas Dhinaca Sadexaad iga codsan karaa in aan fuliyo ogolaansho kale oo u sahlaaya shaacinta diiwaannada quseeya daawaynta ay bixiyaan Dhakhaatiirta Dhinaca Sadexaad.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay shaaciso xogta ka timid diiwaannada marka loogu baahdo qarash ka dalbashada shirkadaha caymiska ama qarash bixiyaasha kale.

- Waxaan fahmayaa oo aqbalayaa in: (i) Ogolaanshahaan uu shaqeynaayo laga bilaabo taariikhda saxiixa ilaa in muddo intaas ka gaaban halkaan lagu baxsho; (ii) In aan ka laaban karo ogolaanshaha wakhtiga aan doono aniga oo soo gudbinaaya ogeysiiska qoran ee ka laabashada ogolaanshaha, marka laga reebo marka ay GPH SBHC cuskatay ogolaanshihii hore.

✍ **Saxiixa Waalidka/Masuulka:**_____________________________________________ Taariikhda:______________

Magaca Farta Waawayn ku qoran: _______________________________________ Xiriirka______________________